

Tix: GSH/05/13  
Kalfadhiga: 3aad  
Kulankiisa 31aad

QARAAR GOLAHA SHACABKA

25<sup>ka</sup> Nofeembar 2013



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Golaha Shacabka

QARAAR GOLAHA SHACABKA

KU SAABSAN

HABRAACA SOO BUUXINTA KURSIGA BANAANAADA

Muqdisho, 25<sup>ka</sup> Nofeembar 2013

BARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA GUDDOOMIYAH GELID / RECEIVED
TAR: 25/11/2014
TIX: 904
SIXIX: <i>[Signature]</i>



### GOLAHA SHACABKA:

**Ka dib markii Golaha la soo gudboonaatay:** kuraas ka banaanaata Xildhibaana istiqaalooda ama geeriyooda oo ka tirsan Golaha;

**Markuu Golaha la kulmay:** isqabqabsi fara badan oo ka aloosma buuxinta kuraasta banaanaata;

**Asagoo qadarinaaya:** hogaamiye dhaqameedka haya xilka iyo qiyamka soo jireenka ah ee xeerdhaqameedka oo ka mid ah tiirarka aasaaska u ah isqadarinta wadanoolaashada bulshada;

**Asagoo xurmo gaar ah u haya:** 135 odayaal ee soo xulay Ergooyiinkii sida ku-meel-gaarka u soo ansixiyey Dastuurka Federaalka Soomaaliya iyo xulida xubnaha Golaha Shacabka;

**Asagoo u tooghaya:** yareynta khilaafaadka ka dhasha soo buuxinta kuraasta banaanaata;

**Wuxuu:** kalfadhiga 3-aad kulankiisa 31-aad ee 25 Nofeembar 2013 si wadaroggol ku guddoonsaday sida soo socota:

### Qodobka 1aad:


In Guddoonka Golaha Shacabka ka sheego fadhiga guud ee Golaha magaca xubinta kursiga baneysay iyo magaca oday dhaqameedka xubintaas soo xulay iyo Taariikhda kursigu banaanaaday warbaahintana laga sii daayo. Haddii kalfadhigu xiran yahayna in uu ugu dhawaaqaa kulanka Guddiga Joogtada warbaahintana laga sii daaya.

### Qodobka 2aad:

Guddoonka Golaha wuxuu hubinaya oo aqoonsanaya kaliya xubinta uu soo xulo oday dhaqameedka ku diiwaangashan galka xubinta kursiga baneysay.

### Qodobka 3aad:

Haddii uu geeriyoodo oday dhaqameedka ku diiwaangashan galka xubinta kursiga baneysay, waxaa beesha oday dhaqameedka ka geeriyooday ku waajib ah in ay Guddonka Golaha Shacabka ku soo wargeliyaan duubka beesha caleemasaaratay oo Wasaaradda Arrimaha Gudaha ansixisay



**Qodobka 4aad:**

Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka waxaa la farayaa in uu sugo galka Xildhibaan walba iney ku jirto warqadda Guddiga Farsamada Hubinta Xulka iyo cadeynta oday dhaqameedkii soo xulay.

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"  
Guddoomiyaha Golaha Shacabka

